



Kaltirsiga dugsiga 2020-21 ayey Guddidu ansixisay

Sanad dugsiyeedka 2020-21 ee Dugsiyada Dadweynaha Portland wuxuu bilaabmi doonaa Arbaca, 2-da Sibtambar, wuxuuna dhammaan doonaa Jimce, 11-ka Juunyo (haddii cimiladu fiicnaato). Kaltirsiga sanad dugsiyeedka soo socda ayey Guddida Waxbarashadu ku ansixiyeen kulankoodii qabsoomay Salaasadii.

[\(Fiir kaltirsiga oo dhammaystiran lana soo dejinsan karo\)](#)

Iyadoo Maalinta Shaqaaluhu soo galayso xilli yara dambaysa 2020, 7-da Sibtambar, saraakiisha degmadu, markii ay wada hadleen Ururka Macallimiinta Portland, waxay isku raaceen inuu sanad dugsiyeedku bilaabmo bartamaha toddobaadka.

"Tani waxay weli oggolaanaysaa degmadu inay culays badan saarto dhawr maalmood oo waxbariseed, taasi oo sidoo kale hagaajinaysa in siiniyeerada dugsiga sare ay helaan maalmo dheeraad ah ama saa'id ah oo ay ku buuxiyaan wakhtiga waxbariseed ee shardiga ah kahor intaan la gaarin xafaha qalinjabinta ee muddaysan marka sanad dugsiyeedku dhammaanayo," Kormeere Guud Guadalupe Guerrero ayaa ku qoray [qoraalkiisa Guddida socday](#) ee kusaabsan kaltirsiga.

Carruurta dugsiga barbaarintu waxay bilaabi sanadkooda Talaado, 8-da Sibtambar. Maalinta ugu dambaysa ee siiniyeerada dugsiga sare waxay noqon Arbaca, 2-da Juunyo, iyadoo xafadaha qalinjabintuna bilaabmayaan Axad, 6-da Juunyo.

Bilaabashada 2-da Sibtambar waxay dhigtay PPS meel u dhaxaysa taariikhaha bilaabashada lagu dhawaaqay ee laba degmo oo jaar ah: Degmo dugsiyeedka Oswego School District waxay ku dhawaaqday bilaabasho ah 31-ka Ogosto, degmo dugsiyeedka Beaverton School District iyadana 8-da Sibtambar ayaa u ah maalinta koowaad.

Iyadoo ka jawaabaysa aragtiyo ka yimi qoysaska iyo shaqaalaha, PPS waxay sii wadi doontaa inay meesha ka saarto daahista bilaabashooyinka iyo cayrinta xilliga hore iyadoo joogtaynaysa jiritaanka shan maalmood oo waxbaris oo dhammaystiran toddobaadkii markii ay suurto gal tahay.

Degmadu waxay mar labaad yeelan doontaa toddobaad dhammaystiran oo ayna jirin fasallo qorshaysan toddobaadka Shukri-naqa, iyadoo shirarka waalidka-macallinku dhacayaan Isniinta iyo Salaasada, 23-ka iyo 24-ka Noofambar. Fasaxa gugu wuxuu noqon doonaa 22-26 Maarso, waxaana loogu talagalay inuu waafaqo taariikhaha jaamacadaha deegaanka.

Afar maalmood ayaa loo qoondeeyey maalmaha barafku caqabadda noqonayo (marka cimilada xun iyo sababo kaleba ay keenaan xirnaanshaha dugsiga). Isniinta, 15-ka Febraayo, taasi oo ah Maalinta Madaxweynaha, waxa loo isticmaali karaa maalmo soo buuxin ahaan, iyo saddexda maalmood ee u horreeya maalmaha toddobaadka kadib maalinta ugu dambaysa ee la qoondeeyey – Isniin-Arbaca, 14-16 Juunyo – sidoo kale waxa loo haysan kayd ahaan si loogu isticmaalo maalmo soo buuxin ahaan, haddii laga maarmi waayo.

Kaltirsiga 2020-21 dib-u-habayn ayaa lagu sameeyey si sifo fudud loogu isticmaali karo, iyadoo taariikhaha maalmaha fasaxa toddobaadka laga saaray waxaana lagu daray foormaat iyo astaamo qofka isticmaalaya aad ugu fiican. Marka lagu daro qaybta Ingiriisida, [kaltirsiga waxa lagu heli karaa in lagu arko laguna soo dejisto](#) dhammaan shanta luuqadood ee aannu ictiraafsannahay.